

Talo Kooban

Xaasaasiyadda Cuntada



Xasaasiyad cunto waa jirka oo kukaca cunno uu umalaynayo in ay yihiin kuwo ubaahan in laladiro oo jirka khatar ku ah.

Difaaca jirka ayaa ladagaalama cuntada uu u'arkayo in ay duulaan kuyihiin jirka, ayagoo dabadeedna sii daynaya kiimiko kiciya xasaasiyadda ama allerjiga saastii cuntada loolaqo ba. Ubadka dhashay iyo kuwa socodbaradkaa ayeey aad usaamaysaa sababta oo ah xasaasiyadda cuntada waxay bilaabataa inta ay caruurta yaryarka yihiin waxayna yaraataa inta uu kaxoogsanayo dheefshiidka iyo difaaca jirka oo ay ilmuhu korayaan.

Calaamadaha ama astaamaha hadiiba waa la arkaa— daqiiqad ama saacad gudaheed markii lacuna cunto lagu xasaasiyoodo — sida caadaada ah. Waxayna baaba'aan 24 saac gudahood.

Astaamaha Caadiga ah

- Maqaarka: finan, xajiin, kor cuncun
- Dheefshidka: matag, shuban, calool majiir

Cuntooyinka Badanaa Xasaasiyadda Keena

- Caanaha lo'da
- Ukunta
- Digirta soy
- Qamadiga
- Malayga
- Alaalaxayda badda
- Lowska
- Geedaha lowska

Calaamado la arki karo

- Calooshoo qasanta
- Dibiro
- Calool majiir
- Matag/Shuban
- Xajiin
- Finan
- Kor cuncun
- Hinraagid
- Sankoo dareera
- Cunaha oo barara
- Hawo mareenka: hiinraag, cabbur, san daroor, carrabka iyo dhuuntoo barara

Tallabooyinka Kahortagga

- Fasalka kafogee cunooyinka xasaasiyadda kiciya (sida miis khaas ah aan lows lagu cuni Karin, waalidiinta oo loodirowaraaq qeexaysa cunooyinka aan la ogolayn in lakeeno xanaanada)
- Hubi dhamaan calaamadaha cunnada in aysan lahayn cunno lagu xasaasiyoodo. Hadii aysan cunnado calaamadda cunnada ayasan lahayn waa in aan cunadaas lacunin
- Hubi in shaqaalaha iyo waalidiinta ay garanayaan cunooyinka xasaasiyadda kiciya

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo

www.inclusivechildcare.org.

Copyright © 2020 Center for Inclusive Child Care

Qalabkan waxaa si tartiib tartiib ah loogu soo saari karaa ujeedooyin waxbarasho. Macluumaadka ku yaal xaashidan tilmaamaha ah waxaa laga beddelay ilo badan.

Dhaqaale ay bixiso Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

www.inclusivechildcare.org